

# Dadka Taageerada Isbitaalka

Qofka qaba naafanimada wuxuu xaq u leeyahayqof taageero\* haddii ay ku jiraan waaxda gurmada ama isbitaal la geeyay. Waqtigaan, COVID-19 wuxuu ku qasbayaa isbitaal badan in ay xadidaan ama aysan u ogolaanin soo booqdayaasha. Si kastaba ha noqotee, sida uu qabo sharciga gobalka, isbitaallada ayaa soo dhaweynayo dadka taageerada u ah bukaanada qaba naafanimada. Booqdayaasha iyo dadka taageerada ah way ku kala duwanyihiin sida waafaqsan sharciga Oregon.

Dadka taageerada ah waxay caawiyaan bukaanada naafada ah ee la geeyay isbitaalka ama ku jira waaxda gurmada kaas oo u baahan caawimaad:

- La xiriirida
- Qaadashada go'aamada daryeelka caafimaadka
- Fahmida macluumaadka daryeelka caafimaadka, ama
- Ka qeybgelida hawlaha nolol maalmeedka

Bukaanada u qalma ama wakiilladooda sharciga ayaa magacaabi kara ugu yaraan saddex qof oo taageero ah. Isbitaalladu waa inay u ogolaadaan bukaanada u qalma ugu yaraan hal qof oo taageero ah inuu la jiro bukaanka waqti walba haddii sidaasi ay lagama maarmaan tahay si uu u fududeeyo daryeelka. Saacadaha soo booqdayaashu ma khuseeyaan dadka taageerada ah. Isbitaal ayaa laga yaabaa inuu leeyahay xaalado badbaado sida xadididda tirada dadka taageerada ah ee la ogol yahay inay la joogaan bukaanka halkii waqtiba.

Dadka taageerada ah waa inay raacaan heerarka badbaadada si ay ugu fuliyaan dooraan, sida xirashada maaskaraha iyo qaadashada taxadarada kale oo ay ka mid noqon karaan laakiin aan ku xaddidneyn gacmo-dhaqashada iyo kala fogaanshaha bulshada.

Haddii bukaan codsiyiisa ku saabsan inuu la joogo qof taageero ah la diido ama la xaddido, taasoo ay ku jirto xadididda tirada guud ee dadka taageerada ah ee la ogolaaday inay la joogaan maalinta inta ay socoto, bukaanka ama qofka taageerada ah ayaa codsan kara shir ku saabsan daryeel taageero ah si loogala hadlo go'aankaan shaqaalaha isbitaalka.

Haddii adigu ama qof taageeradaada ah uu qabo walaacyo dheeraad ah, waxad awooda :

- I-meel u dir Maamulka Caafimaadka Oregon Kooxda Jawaab-celinta COVID-19 ee [covid.19@dhsosha.state.or.us](mailto:covid.19@dhsosha.state.or.us).
- Ka wac Maamulka Caafimaadka Oregon Kooxda Jawaab-celinta COVID-19 503-945-5488.
- Kala xiriir Xuquuqaha Naafada Oregon 503-243-2081.

\* Waxaad ka baran kartaa wax badan oo ku saabsan dadka taageerada ah [xaashidaan xaqiiqda ee katimid OHA](#). "Qof taageerada ah" waxaa loola jeedaa xubin qoyska ah, mas'uul, caawiyaha daryeelka shakhsiyeed ama gacanyaraha kale ee mushaar qaata ama aan mushaar qaadanin oo uu bukaanka soo doortay si uu jir ahaan ama dareen ahaan u caawiyo bukaanka ama uu u hubiyo isgaarsiinta wax ku oolka ah ee lala yeesho bukaanka.